

Taariikh: / /

Xarunta Waxbarashada Dibadda ee Sitra, waa xarun ka shaqeyso adeegyada waxbarashada dibadda, oo ay ugu horreyso soo saaridda aqbalaadda jaamacadaha dibadda, waxa ayna Xarunta u fududeysaa ardayda iney si fudud iyo muddo kooban ugu suurta galiso iney ku gaaraan daafaha caalamka.

Adeegyadeenna waxaa kamid ah:

- Soo saaridda aqbalaadda jaamacadaha iyo college yada wadama dibadda.
- Xareynta visayaasha waxbarasho wadamada dibadda.
- Qabashada ballamada wareysiga visaha.
- Tababaridda sida loo galo wareysida visaha.
- Soo saaridda visayaasha wadama qaar sida Turkey, Kenya iyo Uganda.
- Jaridda tikidyada duulimaad.
- Tala siinta ardayda dhinacyada kulliyadaha iyo waxbarashada dibadda.

Waqtiyada:

- Soo saaridda aqbalaadda jaamacadda waxa ay qaadanaysaa 1 bill – 1.5 bar.
- Xareynta visayaasha waxa ay qaadanaysaa 15 beri.
- Qabashada ballamada wareysiga visaha waxa uu qaadanayaa 15 beri.
- Soo saarista visaha, wadamada qaar waxa ay qaadanaysaa 30 beri.
- Jaridda tikidyada waxa ay qaadanaysaa ugu badnaan 5 beri.

Wadamada la heli karo iyo nooca waxbarasho:

Canada: undergraduate Programs & High School.

USA: undergraduate & English Training Program.

UK: undergraduate Programs & English Learning Programs.

SHURUUDAHA

Qofka loo xareynayo waxbarashada waa inuu heystaa:

- Shahaado Dugsi sare
- Passport
- Bank statement
- Sawir
- Inuu saxiixo warqadda heshiiska

Qaababka lacag bixinta:

- Qofka loo howl galayo waxa uu meel ku shubayaa dhammaan lacagta lagu heshiiyay.
- Inuu qofka bixiyo lacagta ballan qabashada visada, isagoo ku shubayo akoonka safaaradda lagu qori doono ay ku leedahay wadanka markaa uu ku galayo wareysiga visaha, waxa uuna inoo soo gudbin doonaa tiro tixraaceed ku qornaan doonto warqadda uu lacagta ku bixiyay.

Heshiis ka bixidda:

- Haddii qofka heshiiska ka boxo kadib markii uu saxiixo warqadda heshiiska ah waxaa laga qaadi doonaa \$1K.
- Haddii qofka heshiiska ka boxo markii loo shaqo billaabo ama loo soo saaro ogolaanshaha jaamacadda ama college-ka, waxaa laga qaadi doonaa \$3K.
- Haddii qofka heshiiska ka boxo markii loo xareeyo visaha waxaa laga qaadi doonaa \$5K.

Visa haddii qofka lagu soo celiyo:

Waxa ay u qeybsantaa diidmada visada 2 qeybood:

- 1) In qofka documents kiisa kala dhiman yihiin ama aysan sax ahayn
- 2) In qofka hadalkiisa uusan caddeyn iyo iney qilaafsan yihiin afkiisa iyo warqaaha uu wato.

Haddii qofka loogu diiday viisada qalad ka yimid documents ka uu wato, Sitra waxa ay dib u hagaajin doontaa waraaqaha, waxaana mar kale loo qaban doonaa ballanta wareysiga visaha, wixii qarash ah ee ku baxayana innaga ayaa bixin doonno insha Allah.

Haddii qofka loogu diiday viisada qalad qofka xagiisa ka yimid, waxa uu iska bixin doonaa qarashaadka ku baxayo ka dhaqidda documents kiisa diidmada viisaha (visa rejection) iyo qarashaadka qabashada ballanta wareysiga visaha.

F.g:

- Qofka marka loo soo saaro aqbalaadda jaamacadda ama college-ka, inta aan la gaarin xareynta iyo howsha visaha, waa inuu sii aadaa wadanka lagu qori doono inuu ku galayo wareysiga visaha.
- Qofka waxaa loo shaqo billaabaa kadib markii ay nasoo gaarto **waraaqaha** heshiiska oo saxiixan, **waraaqaha** nootaayada oo saxiixan iyo **warqadda** lacag meel wada dhigidda.
- Qofka ugu horreeyo kadib, qof waliba waxaa laga qaadi doonaa lacag **diiwaan galin** \$200 ah.

Lacag kala wareegid

Qofka waxa lacagta laga wareejin doonaa marka garoonka ka dago, ayna qaadaan **Jaamacadda** ama **College-ka**, kasoo dooni doono garoonka.

F.g: qofka waxa uu iska bixi doonaa lacagta lagu soo dooni doono, oo loo shubi doono jaamacadda ama college-ka qaadi doono, ka hor 2 isbuuc inta uusan diyaaradda raacin.

SAXIIX

Md. Xasan Sheekh Mursal Xasan

Arday / Wakiilka Ardayga:

.....

Maamulaha Guud ee Xarunta Soomaaliya

La saxiixay taariikhda:

maalinta: / bisha: /